

Tallaalka Corona



Muxuu yahay tallaalka Corona

Tallaalka Corona wuxuu kaa badbaadinaayaa fayruska-Corona. Waxaa tallaalka lagu siinayaa qaab cirbad oo garabka lagu mudo. Tallaalka ka dib ma xanuunsaneysid ama wax yar ayaa fayruska ku xanuunsan kartaa.

Maxaa jirkaaga gudahiisa ka dhacaaya

Tallaalka ayaa sababaaya inuu jirkaaga sameeyo difaac fayruska ah. Markaasoo jirkaaga uu aqoonsanaayo fayruska tallaalka ka dib. Markaasi jirkaaga dhaqso ayuu fayruska u dilaayaa. Adiga ma xanuunsaneysid ama xanuun aan badnayn ayaa yeelaney.

Weli lama oga inta uu tallaalka jirkaaga uu ka badbaadinaayo Corona.

Ma yahay mid amaan ah

Tallaalka si dhaqso ah ayaa loo sameeyey. Taasi waxaa keenay in dad badan oo dunida oo dhan iney tallaalka si wadjir uga shaqeeyeen. Ma jiraan waxyaalo laga tagay. Taasi ma dhaceyso, waayo nidaamka u degsan sameynta tallaalka waa kuwo aad u adag.

Markii tallaalka diyaar noqdeen, dad badan ayaa lagu tijaabiyey. Ka dibna waxaa soo ansaxiyey ururada EMA iyo CBG. Ilaa hadda waxaa tallaalka Pfizer / Biontech lagu tijaabiyey sidoo kel ilmaha laga bilaabo 12 jir. Iyagana waa loo ansaxiyey tallaalka.

Hadda tallaalka waa la isticmaalaa welina waa la baaraa amaankiisa.

Waxyaalaha uu keeni karo



Sida dhamaan tallaalkada kale ayaa xanuuno kala kulmi kartaa tallaalka ka dib. Taasi waxaa lagu magacaabaa waxyaalaha uu kugu keeni karo.

Waxaa tusaale ahaan aad yeelan kartaa:

- Xanuun meesha lagaa muday
- Madax xanuun
- Daal
- Murqo xanuun
- Xumad /qandho

Kuwani waa waxyeelo fudud oo ay reebaan. Sida badan wey jiraan haddana dhowr beri ka dib wey baaba'aan .

Waxyeelo aad u daran waa mar dhif ah. Laakiin haddii aan xanuuno isku aragto wiigaga tallaalka ka dib, waxaa wacdaa dhaqtarkaaga qoyska.



Yaa qaadanaaya tallaalka ama la tallaalayaa

Waxaa Nederland ballan loo sameyn karaa qof walba laga bilaabo 12 jir. Taasi waxaa laga sameyn karaa internetka tooska ama telefoonka. Internetka tooska ayaa ballan ka sameyan kartaa: www.coronavaccinatie-afspraak.nl. Talefoonka waxaa ballan ka sameysan kartaa nambarka: 0800 7070

Waxaa jira tallaalo noocyo kala duwan.

Adiga ma dooran kartid nooca tallaalka aad rabto.

Dhamaan tallaalka la isticmaalaayaa waa la soo tijaabiyey iyo waa la soo ansaxiyey.

Goorma aadan is tallaaleynin

Dhaqtrkaaga goyska wac haddii aad:

- hore xasaasiyad aad ka qaaday tallaalka aad qaadatay ka dib
- aad tallaalka 1aad ka dib aad xasaasiyad daran aad yeelatay

Waxaa fiican inaad tallaalka dib u dhigto oo aad ballan cusub sameysato haddii :

- haddii aad aad u jiran tahay maalinta talaalka
- aad leedahay xumad 38 darajo ama ka badan
- aad qabto corona
- aad leedahay calaamadaha badiyaa lagu arko Corona
- haddii aad baaritaan corona sameysey oo aadan weli ogayn natiijada
- haddii aad la xariirtay qof qaba corona

Markaad uur leedahay

Koox dhaqaatiiro iyo aqoonyahanno ayaa baaritaan ka sameeyey tallaalka iyo uurka.

Taladooda waa in dhamaan dumarka uurka leh ay iska talaali karaan Corona.

Tallaalka ka dib

Haddii aad tallaalka ka di baad xanuuno Corona isku aragto, markaa iska soo baar.

Tallaalka ka dib rajada inaad fayruska dad kale u gudbisoo waa ay yar tahay. Laakiin tallalka ka dibna fayruska waad gudbin kartaa.

Tallaalka ka dib sii wad inaad tallooyinka guud ku dhqanto, sida dhaqida gacmaha iyo dariishada oo la furaa.

Cirbad dheeraad ah

Laga bilaabo disembar 2021 waxaa suura gal ah inaad cirbad dheeraad inaad qaadato:

- haddii 80 jir ama aad ka weyn tahay
- haddii aad degan tahay guriga waayeelka ama aad xarun degan tahay
- haddii aad bukaanka la shaqeysa

Cirbada dheeraadka wey sii yareyneysaa rajada inaad aad u xanuunsato.

Cirbada dheeraadka waxaa kaloo lagu magacaabaa xoojiye ama (booster)

Ma qabtaa su'aalo kale oo ku saabsan Corona fayruska:

La xariir **0800-1351**

